


# Daaweynta Infakshanka Qarsoonka ee Qaaxada

Natiijada baaritaankaaga waxay muujinaysaa in aad qabto infakshanka qarsoon ee Qaaxada (TB), ama “LTBI.” Marka uu qof qabo LTBI jeermiska Qaaxada (TB) jidhkooda ku jira waa kuwo “jiifa” balse weli waa ay nool yihiin. Jeermiska Qaaxada (TB) waxaa ay ahaanayaan kuwo “jiifa” inta uu jidhkaagu iska difaaci karo. Marka aad qabto LTBI waxaad Qaaxada (TB) u gudbinaysaa dadka kale.

Marka uu jidhkaagu joojiyo in uu iska difaaco jeermiska Qaaxada (TB), waa ay “ka toosayaan” waxayna billaabayaan in ay tarmaan. **Xilli kasta ayeey sidaan ku dhici kartaa qof kasta oo qaba LTBI.** Marka uu jeerkiska tarmo waxaa loo yaqaan “cudurka Qaaxada (TB).” Dadka qaba cudurka Qaaxada (TB) aad ayeey u xanuunsan karaan waxayna u gudbin karaan dadka kale.

## Sideen uga hortagi karaa cudurka Qaaxada?

Isoniazid (INH) ayaa caadi ahaan lagu daweyaa LTBI. INH waxay dishaa jeermiska “jiifa” ee Qaaxada (TB) **ka hor** inta aysan keenin in aad ku xanuunsato. Maadaama jeermiska Qaaxada (TB) ay yihiin kuwo xoog badan, dhowr bilood ayeey qaadataa in daawadu ay disho.



Waxay INH fiican tahay in aad maalin kasta qaadata illaa uu takhtarkaagu ka oggolaado in aad joojiso.

Waa in aad takhtarkaaga aragto bishii mar inta aad qaadata INH si loo xaqiijiyo in daawadu ay si fiican hawsha u wado.

## Waa maxay sababta aan u qaadanayo daawada haddii aanan xanuunsaneyn?

INH waxay dishaa jeermiska Qaaxada (TB) ee jidhkaaga ku jira **ka hor** inta aysan “ka toosin” oo aadan ku xanuunsan.

## Maxay tahay in aan ka ogaado daawada LTBI?

Dad badan ayaa maalin walba qaata daawada INH iyagoo aan kala kulmin wax dhibaato ah, balse **waxaa jira dhowr waxyaabood la doonayo in aad ka digtoonaato:**

- Xumad ku haysa in ka badan seddex maalmood
- Cunto cunid xumi, miisaanka oo kaa dhaco, ama sabab la’aan daal kuu hayo
- Lablabo ama matag:
- Xanuun bogga ah
- Kaadi midab leh (midabka shaaha ama qaxwada)
- Maqaarka ama indhaha oo huruud noqda
- Firiiric iyo cun-cun maqaarka ku dhaca
- Cagaha ama gacmaha aad ka kabaabyooto ama jiriiricooto
- Qufac socda muddo ka badan seddex asbuuc
- Dhidid habeenkii aad isku aragto

**Haddii aad qabto mid kasta oo ka mid ah dhibaatooyinkan, jooji in aad qaadata INH waxaadna si dhaqsi ah u wacdaa isbitaalka – ha sugin inta aad ka gaarayso ballanta xigta.**

## Waxyaabo kale oo muhiim ah:

- Khamri la cabo inta aad qaadanayso INH wuxuu dhibaateyn karaa beerkaaga. Ha cabin biirta, weynta, ama khamriga culus inta ay kaaga dhammeynayso daawada LTBI.
- Takhtarkaaga u sheeg haddii aad qaadata daawooyin kale ama aad uur leedahay.



# Daaweynta Infakshanka Qarsoon ee Qaaxada (TB) - bogga 2-aad

## Maxaa dhacaya haddii aanan qaadan daawada?

Haddii aadan qaadan INH ama aad joojiso in aad islamarkiiba qaadato daawada, waxaa suuragal ah in uu kugu dhaco cudurka Qaaxada (TB). **Xilli kasta** ayeey sidaan ku dhici kartaa **qof kasta** oo qaba LTBI.

## Maxaan sameynayaa haddii hore la ii siiyay tallaalka BCG?

Dalalka lagu yaqaan Qaaxada (TB), waxaa dadka badankood la siiyay tallaalka BCG. BCG Qaaxada (TB) ayeey carruurta ka badabaadin kartaa, balse waxay qaadanaysaa sanooyin yar.

Dadka la siiyay tallaalka BCG waxaa ku dhici kara cudurka Qaaxada (TB)! Haddii hore lagu siiyay tallaalka BCG, waxaad weli uga sii badbaadi kartaa adigoo qaata daawada LTBI.

## Maxaa dhacay haddii aan meel kale u guuro?

Haddii aad gobol ama magaalo kale u guurto, la socodsii takhtarkaaga inta aadan guurin **ka hor**. Waxay takhtaatiirtu hubinayaan in aad hesho daawadaada Qaaxada (TB) marka aad guurto.

**Ka badbaadi naftaada, qoyskaaga, iyo asaxaabtaada Qaaxada (TB) – Waxaad wada qaadataa daawadaada Qaaxada (TB)!**

## Sideen u xusuusan karaa in aan daawadeyda qaato?

**Waxaa muhiim ah in aad maalin kasta qaadato daawadaada INH.** Haddii aadan qaadan dhowr maalmood daawadu ma ay shaqeyn doonto. Qaado daawadaada illaa uu takhtarka ka oggolaado in aad joojiso.

Qaar ka mid ah fikradaha kaa caawinaya in aad xusuusato:

- Waxaad daawadaada dhigataa meel aad maalin walba ka arki karto.
- Waxaad ka codsataa qof qoyska ka tirsan ama saaxib in ay ku xusuusiyaan.
- Waxaad calaameysaa jadwalkaaga marka aad kaniinka qaadato kaddib.
- Waxaad isticmaashaa sanduuqa lagu xusuusto kaniinka.
- Waxaad maalin kasta kaniinka qaadataa isla waqtigii. Tusaale ahaan, marka aad ilka cadayato, quraacdo cunto, ama inta aadan seexan ka hor.

Haddii aadan maalmo qaadan, qor si aad ugu sheegto takhtarkaaga ama kalkaalisada ballanta dambe aad baaritaanka la leedahay.

## Isbitaalkaaga:

---



---



---

## Lambarka Taleefoonka:

---

